



Fahanka Gu'ga Ardaygaaga 2025 ee Maine ayadoo la Adeegsanaayo Warbixinta Buundada Imtaxaanka

Cabirka Buundada Maine

Jaantusyada midabka leh, ee jiifa ee ku qoran warbixinta ardaygaaga ayaa muujinaaya buundada heerka ardaygaaga ee Maine. Buundadaan ayaa cabiraysa dedaalka ardaygaaga ee ku aadan imtaxaankaan ayadoo laga eegaayo xirfadaha muhiimka ah ee akhriska iyo xisaabta ee heerka fasalkiisa marka loo eego Heerarka Buundada Guud ee Gobalka.

Imtaxaanka akhriska ee fasalka 4-aad wuxuu cabiraa xirfadaha sida:

- Khulaasaynta qodobada muhiimka ah ee sheekooyinka, ciyaaraha, gabay-yada, iyo qoraalka xogta.
- Adeegsiga faahfaahinta iyo tusaaleyaasha qoraallada marka la sharxaayo waxa qoraalladu sheegayaan.
- Samaynta isku xirka ayadoo la adeegsanaayo cadeynta ku jirta qoraalka.
- Aqoonsiga fariinta ama casharka laga baranaayo sheekada, ciyaarta, ama gabayga ayadoo la adeegsanaayo faahfaahinta guud.
- Isku eegista iyo isbarbar dhigista sheekooyinka ay qoreen qoraayaasha kaladuwan ama kala matalaaya dhaqannada kaladuwan.

Imtaxaanka xisaabta ee fasalka 4-aad wuxuu cabiraa xirfadaha sida:

- Isku dhufashada iyo isku qaybinta tirooyinka godadka badan.
- Fahanka jajabka siman.
- Isku daridda iyo kala jaridda jajabyada leh hooseyaha isku mid leh.
- Ku dhufashada jajabyada tiro guud.
- Ku kala soocida qaababka sifooyinkooda.

Cabirka Buundada Maine ayaa la xiriiirta heerka guusha oo qeexaaya sida waxqabadka ardaygu u waafaqsan yahay himilooyinka gobalka. Heerarka guusha ayaa Aad uga Hooseeya Filashada Gobalka, Ka Hooseeya Filashada Gobalka, Ku siman Filashooyinka Gobalka, iyo Ka Sareeya Filashooyinka Gobalka.

Aalada Fahanka Heerka Guusha

[Aalada Fahanka Heerka Guusha](#) ayaa ku siinaysa xogta faahfaahsan ee heerarka gaarka ah ee waxbarashada oo lagu qiimeynaayo heerka fasal kasta iyo sida heerarkan loogu kala qaybiyo xirfadaha kaladuwan ee heerka kasta oo guusha kamid ah.



Hel Aalada Fahanka Heerka Guusha